



## Majiro qof dambaabaya dambi, oo intuu kaco dahaara qaadanaya salaadna tukanaaya, ka dibna istiqfaarsanaya, haduu jirose Ilaahay wuu u dambi dhaafayaa isaga

Cali Bi nu Abii Daalib-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: waxaan ahaa nin haduu Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-xadiis ka maqlo Ilaahay ku anfici jiray intuu doono, haduu nin asaxaabta Rasuulka ahi ii sheegana waan dhaarin jiray, markuu iidhaarto ayaan rumaysan jiray, Abuubakar baa iisheegay, Abuubakarna waa run sheege, wuxuu yiri: waxaan Rasuulka Ilaahay ka maqlay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate- isagoo dhahaya: "Majiro qof dambaabaya dambi, oo intuu kaco dahaara qaadanaya salaadna tukanaaya, ka dibna istiqfaarsanaya, haduu jirose Ilaahay wuu u dambi dhaafayaa isaga", intaa ka dib aayaddanuu akhriyey: "kuwa marka ay dambi xun sameeyaan ama naftooda dulmiyaan Ilaahay xusaya ee dambi dhaaf way diisanaya" [Aala cimraan:135].

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi,nasaa.i,ibn maajah,Axmad]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay in uusan jiro adoon inta uu dambaabo dambi, sifiican u wayso qaata, oo labo rakcadood oo tawbo keen ah tukada, intaa ka dibna Ilaahay waydiista dambi dhaaf, Ilaahay uu u dambi dhaafaya. Intaa ka dib wuxuu akhriyey Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate, Aayadaan qur'aanka ah: {kuwa marka ay xumaan sameeyaan ama naftooda dulmiyaan Ilaahay xusaya, ee dambiyadooda Ilaahay inuu u dhaafo waydiisanaya, Ilaahay mooyee ma cid kalaa dhaafta dambiyada, kuwaasoo aan ku adkaysan dambiyada ay sameeyeen} [Aala cimraan:135].

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65063>

